kommunales jobcenter

LANDESHAUPTSTADT

WIESBADEN

Magaalo madaxda Gobolka

Wiesbaden

**Xeerarka quseeya dadka qaata biilka cayrta**
**Sidda ugu xusan buuga xeerka danyarta qaybtiisa labaad (SGB II)**

**Waajib ahaanshaha la shaqaynta iyo tusaalooyinka guud**

**§ 1 qaybta 1 SGB II**

Qofka shaqo doonka ah qarash nololeedkiisa waxaa loo siinayaa si uu isaga masuul isaga noqdo, maadaama uu yahay qof shaqodoon ah oo hawl qaban kara iyo inta la noolba, ee si wadar ah qarashkaasi loo siiyo, si hadhaw ay u xoojiso inay noloshoodda dabartaan, taasoo loogu simayo inta ay qarash-nololeedkoodda, iskooda u so dhacsan karaan. Kuwa kara inay shaqeeyaan waxaa la siinayaa qarashkaasi, waa hadaysan karin inay si kale noloshoodda u dabartaan. Mabda'a sinaanta ragga iyo dumarka waa in si joogto ah loo tixraaco

**§ 10 qaybta1 ee SGBII**

Qofka aan hawlgab ahayn ee biilka la siiyo waxaa qasab ku ah inuu shaqo kasta qabto, hadaysan jirin cilad jis-miga ah, maskaxda ama ruuxa ah, shaqadda uu qabanayana aysan ka culays badneyn kii uu horey u soo qaban jiray, waayo shaqadii uu horey u hayay ay ku cuslayd, ama shaqadda ay wax u dhimi karto korninta ama Tarbiyada caruurtiisa kuwa afadiisa, ama afadda lafteedda; kobcinta caruur seddex jiraystay, sidda caadada ah wax looma dhimin, haddii loo helo meel maalintii lagu xanaaneeyo, ama lagu barbaariyo, sidda uu farayo Buuga seddexaad, ama meelo kaleba laga soo xaqiijiyay; komuunatiga qaabilsan ayaa u xilsaaran inay ku hagaan qof shaqaayn kara ee masuuliyadda ka saaran ciyaalka in laga hormariyo siinta qoobta xanaanadda caruurta, hadduusan iskii u keeni karin inuu ciyaalkana xanaaneeyo, shaqana uu qabto, kaasoo si kale xal oogu heli karin inuu caruurtiisi la xanaaneeyo iyo haddaan jirin wax kale oo is hortaagi karaan inuu shaqadaasi qabto.

**§ 31 SGB II (Nuqul)**

Qofka aan hawlgabka ahayn ee xaqa u yeeshay in la siiyo biilka wuxuu wajibaadkiisa gudan waayay marka si qoraal ah loogu wargaliyay waxa soo wajahi kara ama loo sheegay hadduu diido

1. hadduu diido inuu buuxiyo axdiga xubinnimadda ama xeerka u dhigan maamulka qodobkiisa § 15 qaybta 1aad jumladda 6aad ee ah inuu qofka waajibaadkiisa guto, gaar ahaan inuu muujiyo inuu iskii isku taxluujiyo si uu marxalada shaqo doonka ah oga gudbo,

2. hadduu diido shaqo uu qaban karo, waxbarasho, fursad shaqo sidda qodobka § 16d ama sidda shaqo la kabayo qodobka § 16e inuu aqbalo, horay u sii wado ama dhabcigiisa is hortaago dhaqan-galintiisii ama fulintiisii,

3. hadduu tagi waayo meel loo diray oo qayb ka ah sidda shaqadda lagu helo, ama aad iskaa u joojisid ama sabab u noqotid inaad dhamaystirtid ama dhamaysid.

Qodobadan ma dhaqan gaalayaan, hadduu qofku la yimaado caddaymo muhiim ah oo qeexaya waxa ku kalifay inuu sidda u dhaqmo.

Qofka hawl-karka ah ee biilka qaata waxaa loo qaadan karaa inuu waajibaadkiisii dhaawacay, marka

1. uu qaangaar noqday oo 18 jirsaday, daqliga soo gala, ama kayd meel u yaala runta ka sheegin, kaa soo qasdigiisu yahay in loo ogolaado ama loo kordhiyo biilka cayrta ee shaqo la`aanshaha lagu siiyo II,

2. isagoo loo sheegay/baray waxa ka imaan kara ama ogaysiiyay inuu biilka si mecno-daro ah u adegsanin, is la mar ahaantaana uusan ka waantoobin,

3. Taabanayso xaq u yeelashadda shaqo-doonka, ama ay ka xiranto, waayo Hayadda shaqadda xanibaad ka saartay, amaba ka xirantay xaq u yeelasha sidda xeerka buuga seddexaad ku cad, ama lagu soo bandhigay, ama

4. Waxaad buuxisay sidda ku cad sharuudaha ku qoran buuga seddexaad amaba lagu qeexay, xaaladda suurtagalinaysa wakhti hakad-galin ah, xanibaad ah, kaa soo keenay ama sababu noqonay in la joojiyo lacagta shaqo doonka.

**§ 31a SGB II (Nuqul)**

Marka lagu xadgudbo godobka § 31 waxaa is dhimsaya lacagta shaqo-doonaha marka hore 30% intuu qofka hawl-qaban kara lagu masruufo, qodobka § 20 inta uu qofka ku noolaan karo. Marka xiga oo uu falkan ku noqdo, waxaa dhaqan galaya qodobka § 31, kaa soo hoos u dhigaya biilka qofka ku noolaan karo 60% daqliga la siinayo qofka shaqo gaban kara ee loo ogolaaday in la siiyo biilka noloshiisa, tixraac qodobka § 20 ee baahida caadiga ah. Mar walbo oo falkaasi soo noqdo waxaa dhaqan galaya qodobka §31 waxaana meesha ka baxaya taageerada la siiyo qofka shaqo-doonka ah gabi ahaan.

**§ 32 SGB II (Nuqul)**

Hadday dhacdo inuu qof loo ogolaaday in Biilkii uu ku noolaan laha la siiyo, marka si qoraal ah lagu wargaliyo, waxa ka raaci kara haduusan tixgalinin, waxa ay ka codsatay xafiiska lacagta siiso, sidda hadduu tagi waayo balanta doktorka, ama Saykolojistaha doktorka xanuunka nafsiga qaabilsan, waxaa laga goynayaa biilka la siiyo 10%, sidda qodobka §20 nidaamka baahida uu qorayo. Tani waxaan la cuskan Karin ama la tiigsan Karin, marka qofka cudurdaar muhiim ah ka keeno sababta ku kaliftay inuusan tixgalinin arintaasi.

**§ 34 SGB II**

Qofka gaara 18 ee si ola kac ah ama ahayn u jabiyay asbaababha loogu ogolaaday biil in la siiyo, sidda ku cad buuga, ama dadka qofkaasi la nool, ee si wadajir ah loo siiyo biilka, taasoo aan muuqanin sabab cad, waxaa laga doonayaa inuu dib u soo celiyo qarashkii ku baxay. Dib u soo celinta qarashka waxaa ka mid ah ah qarashka caymiska waayeelnimadda iyo caymiska-xanaanada qofka marka uu da'gaaro ama xanuunsado. Dib u soo celintaasi waxaa laga cafin karaa, hadday noqoto mid aan lagu fulin karin oo ay ku adag qofkaasi.

**§ 60 qaybta 1 buuga danyarta (SGBI)**

Qofka cayrta codsanaya ama qaato, waa inuu

1. Wax walbo waa inuu sheegaa, kaa soo daruuri u ah ogolaansha biilka cayrta iyo marka ay ka dalbato xafiiska biilka cayrta siiso, inuu soo gudbiyo aqbaar walbo oo daruuri ah iyo in uu ogolaado in meel seddexaad laga soo qaadan karo warbixinadda,

2. Hadday wax iska bedelaan xaaladda dhaqaalaha, kaa soo wax weyn ka taraya siinta biilka cayrta ama arinta la xiriirta siinta biilka qeexaysa, waa in sida ugu dhaqsaha badan loo soo gudbiyaa.

3. Caddaymo in la sheego, ama la soo hordhigo marka ay kaa soo codsato hayada biilka cayrta ku siiso, dokumentyadda caddaynayana soo hordhigtid ama in la soo hordhigo ogolaatid.

**§ 66 qaybta 1 ee buuga kowaad, buuga xeerta cayrta (SGB I)**

Qofka qaata taageeradda biilka cayrta, amaba raba inuu codsado, balse uu fulin waayo waajibaadkiisa la shaqaybta hayada lacagta siisa §60f iyo hadduu is hortaago caddaynta arimahaasi la xiriira. Cidda lacagta siiso waxay ka joogin kartaa siinta lacagta, inta uu dib ooga saxayo, ama arinta ka toosinayo, guud ahaan ama qayb, inta ay waxa kala caddaanayaan ama la soo helayo inuu buuxiyay shuruudaha lagu siinayo kaalmadda dhaqaale. Tan waxaa la mid ah oo ay hirgalaysaa marka qof cayrta la siiyo, si ola kac ah isku hortaago caddaynta arintaasi.

**§ 263 Buuqa ciqaabta (StGB) – Nuqul**

(1) Qofka damca ama qof seddexaad xoolo sharci dara ah ku helo, kaa soo qof kale lagu wax yeelayo ama dhaawacayo, hadduu arin been ah sidda muraayaddii dadka u tusiyo, ama si iska yeel yeel ah isagoo ku qarinayo waxa dhabta ah, kaa soo jahawareer keenta ama uu adeegsado, waxaa lagu xukumayaa xarig illaa 5 Sanno ama ciqaab ganaax ah.

(2) Isku dayga ayaa ciqaab ah.

(3) Gaar ahaan hadda dhacdada tahay mid mug –weyn, waxay ciqaabteeda noqonaysaa inta u dhexaysay 1 – 10 Sanno oo xadhiga ah.

**§ 1 Xeer lacagta kiradda (WoGG)**

Dadka qaata lacagta SGB II, SGB XII waxaa la socota lacagta kirada, siddaa darted xaq u malaha in la siiyo lacagta kiradda (Kiradda oo la kabo). Qofka qaata lacagta kirada WoGG, isna xaq uma alaha in la siiyo biilka cayrta SGB II iyo SGB XII

**Guud ahaan**:

**waxa loo baahan yahay in la soo codsado/ ogolaashaha inta wakhti ee lagu xadiday**

Siinta biilka SGB II guud ahaan waxa lagu ogolaadaa codsi (§ 37 SGB II). Inta ay siismadaasi socodayso waxay ku xiran tahay, sidda qoraalka ogolaashaha lagu xadiday (cudada la ogolaaday). Inta uusan cudadaasi dhamaanin waa in wakhti hore

la soo codsadaa si siinta loo kala bar-go'in ama wakhti kordhintiisa. Haddaadan sii wadista SGB II inta uusan kaa dhamaanin soo codsan waydo, waxaa lagaa jooginayaa siinta biilka SGB II. Waxaa kuu sheegaynaa oo kale, in xitaa lagaa bixin doonin caymiska caafimaadka iyo caymiska rentadda ama da'da lagu qaato. Caymiska caafimaadka waa inuu qofka iskii isaga bixiya, waa hadaysan jirin codsiga ah in biil siinta laguu sii wado. Fadlan la xiriir cidda ku shaqadda leh arimaha.

**Ogaysiis ku saabsan nidaamka –baahida:**

Nidaamka baahida waa mid si joogto ah baahidda u daboosho, midka halka mar kaliya ahna waa si isku duuduub ah, taa mecnaheeddu waxay tahay, wax intaa ka badan ama dhaafsiisan inaan lagu ogolaanaynin. Guud ahaan waxaa ku jira, cunnada, cabitaanka aan alkolo ku jirin, dhar, kabo, hooy (aan ku jirin kiradda), korontadda, habaynta guriga, qalabka guriga, galabyadda guryaha lo isticmaalo, waxa laysku dhaqo ama carfiyo, Ticket, TV, qarashyadda fasaxa (Hiddaha iyo Dhaqanka), Carwadda, Masraxa, waxbarashadda, kola ad maqaaxi wax ka contid, iyo waxii kaloo la mid ah.

Fadlan la soco in aadan taageero gaar ah oo intaa ka badan lagu siin doonin.

**Hanti/Raasumaal**:

Haddaad leedahay dhaqaalo aad meel dhigatay (kayd) ama qof ka mid ah kuwa kula nool uu leeyahay, waxaa waajib kugu ah inaad sheegtid hayadda biilka cayrta ku siiso ood isaga xaadirisay inaad shaqo-doon tahay, caddaymahoodana soo hordhigtid.

Raasuulka sidda sharciga ku cad, wuxuu noqonayaa waxa dhaafsiisan, inta la saamaxay, ee halkan ku cad:

| daqliga la saamaxay ( laga bilaabo 17.04.2010) | | | |
|---|---|---|---|
| Nooca daqliga | Daqliga/Cimriga | Daqliga ugu yar | Daqliga ugu badan |
| daqliga aasaasiga | 150,- Euro | Qofkiiba 3.100,00Euro | Qofkiiba 9.750,00Euro*<br>Dadka dhashay 01.01.1958 |
| Waxaa u kordhaya dadka dhashay 01.01.1948 ka hor | 520,00 Euro | Qofkiiba 3.100,00 Euro | Qofkiiba 33.800,00Euro |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Riester-Rente | Gabi ahaan waa la sugay | | |
| Dhiigaalka kale | 750,00 Euro | Ma jiro | Qofkiiba 48.750,00Euro**<br>Dadka dhashayintii ka horaysay 01.01.1958 |
| Waxa lagama maarmaanka ah loo adeegsado | Qofkiiba loo saamaxay<br>750,00 Euro | Baahida sidda wadarta loogu baahan yahay | Baahida sidda wadarta loogu baahan yahay |

*Lacagta laysku fasaxay waxay u kordhismaysaa dadka dhashay inta u dhaxaysa 31.12.1957 iyo inta ka hor dhalatay 01.01.1964 waa 9.900,00 Euro. Kuwa dhashay 31.12.1963 lacagta ay kayd u dhigan karaan waa 10.050,00 Euro
** Ugu badnaan waxaa loo ogolyahay inay kayd u dhigtaan marka ay gaaraan da'da waayeelnimada, amase qiimo lacageed wuxuu kordhayaa xaq u yeelashaddiisa dadka dhashay 31.12.1957 ka dib iyo 01.01.1964 ka hor lacag gaaraysa 49.500,00 Euro. Dadka dhashay intii ka dambeysay 31.12.1963 waxay kayd u dhigan karaan lacag gaaraysa 50.250,00 Euro

**Ogaysiis:**

- Daqliga la ogolaaday ee hor ku xusan, waxaa loo fasaxay oo kaliya qofka qaan-gaarka ah iyo qofka ay wada nool yihiin, ee sidda wadajirka ah biilka loo siiyo.
- Daqliga la fasaxay, ee loo adeegsan karo xaaladaha muhiimka ah waa illaa 750 Euro, tani waxaa kaydsan kara qof walba oo reerkan ka tirsan oo si wadajir ah biilka loo siiyo

**Yeelashadda Daqliga kale ee la ogolyahay:**

- Ilmaha yar ee biilka la siiyo wuxuu Daqli u haysan karaa illaa 3.100,00Euro
- Qiimo lacag u dhiganta oo la ogolyahay in meel loogu dhigo xiliga hawlgabka waayeelnimadda, kaa soo qandaraas awgii aan la isticmaali karin, illaa xiligaa waayeelnimada laga gaarayo iyo qiimaha lacageed uu xaqa u leeyahay inuu kaydsado waa 750 Euro sanadkiiba, kaa soo shaqo-qaban kara balse u baahan in biilka la

siiyo isaga iyo afadiisa, kuwaasoo aan ka badsan karin kayd aan ka badnayn 48.750,00 Euro. Inta ugu badan ee la fasaxay si loo hubiyo in la sug nololsha waayeelnimadda ama qiimo lacag oo u dhiganta dadka dhashay intii ka dambeysay 31.12.1957 iyo intii ka horaysay 01.01.1964 lacag gaaraysa 49.500,00 Euro. Dadka dhashay intii ka horaysay 31.12.1963 waxay haysan karaan kayd gaaraya 50.250,00 Euro

**Hanti ahaan waxaan loo tixgalin karin:**

- Alaabta guriga la dhigto, ee ku haboon,
- Baabuur u qalma qof walbo qaata biilka cayrta oo aan hawl-gab noqonin,
- Kaydka waayeelnimada, inta uu xeerka federalka Jarmalka ogolyahay, kaa soo wehlisa wixii kor-socod ku ah si uu ugu noolaado xiliga uu waayeelka noqdo, sidda (Riester-Rente, Rürup-Rente, Lacagta hawlgabka shaqada)
- Qof meherad leh, inta loogu talagalay oo ku filan inta kaydka waayeelka loogu talagalayna haysto, balse isagoo hawl-qaban kara u baahan in nolosha laga caawiyo isaga iyo xaaskiisa, kaa soo laga cafiyay isaga iyo xaaskiisaba bixinta lacagta loo goosto caymiska waayeel nimadda.
- Qofka gurigiisa isticmaalayo, oo waynintiisuna caadi tahay, ama abaartament uu isaga leeyahay ku nool,
- Hanti, lagu caddayn karo in sidda ugu dhaqsaha badan lagu doonayo
  In dhul weyninkiisu caadiyahay lagu gato, hadday walibo ujeedadu tahay meel lagu doonayo in qof cuuryaan ah la dajiyo ama qof taakulayn u baahan wax loogu qabanayo, taa soo haddi la isticmaalo, ujeedadii laga lahaa meesha ay qatar galayso,
  - Shay iyo Sharci haddii si mecno daro ah loo isticmaalo, ama qofka ay qusayso, ay wax weyn u dhimayso. Inuu mug macquul ah yahiin waxay ku xidhan tahay sidda xaaladu tahay inta uu qaadanayo biil cayrta, kaa soo nolosha lagu illaalinayo inta uu qofka yahay shaqo doon.

**Ujeedo ku xiran isticmaalka biilalka cayrta**

Mar hadaad qaadanaysid biilka cayrta, waa inaad sidda xeerka tilmaamayo u isticmaashaa sidda (ku bixinta Kirada, ku kululaysiga guriga, hal jeer oo kab-dhaqaale ah). Waxaa waajib kugu ah biilkan inaadan si siddaa ka baxsan u

isticmaalin. Haddii kale waxaa suurtowda sidda qodobka § 47 SGB X oo ku lamaanin qodobka § 50 SGB X ay qorayaan, in biilalkaa dib lagaaga soo ceshado.

**Caymisyadda Caafimaadka, taakuladda iyo hawl-gabka da'da**

Ogolaanshaha lacagta shaqo-laabaha II, waxaa isna furmaya xeerka qasabka ah ee caymiska caafimaadka iyo kan taakulada. Bil walba waxaa qarashyadaasi shubaya hayada bixiso biilka cayrta oo u shubta xafiiska caymiska federalka. Xaadirinta caymiska waajibka ah waxaa is kaleh caymiska sidda sharciga ah u quseeyo. Sidoo kale hadduu qofka uugu jiro caymiska qoyska, isna looma subayo oo waxaa looga xaadirinayaa midka qoyska. Siddoo Hadduu qofka iskii si shaqsi ah ooga midnoqdo caymis privat-ah, waa ka mamnuuc inuu galo midka waajibka ah, balse wuxuu heli karaa in qayb laga bixiyo sidda qodobka § 26 SGB II.

Midda xeerka caymiska waayeelka waa laga bixinayaa inta uu qaadanayo biilka shaqo-goobe II, inta waajibka ku ah. Dadka qaarkii (sidda caruurta iskuulka ku waajiba) waa laga bari jeelay arintaasi.

Hadduu qofku dayn-ribax la'aan ah loo ogolaado, ama qodobka § 27 SGB II wax loogu ogolaado, waajib kuma ah inuu galo caymiska waajibka ah, ee xeerka caymiska caafimaadka, kumana qasbana midka caymiska waayeelka.

Guud ahaan waxaa hirgalaya marka uu kaa dhamaado siinta biilka cayrta inay iyaguna istaagayaa caymisyadda caafimaadka iyo caymiska waayeelka. Qofka waa inuu iskii u galaa caymisyasaasi, sidda isaga oo qabta hawl ku waajib ah caymiska bulshada ama si folontari ah caymis u gashid.

**Caymiska Shilka**

waad ku jirtaa caymiska shilka, hadday hayada biilka ku siiso shaqo gaar ah oo arimaahsi qasbaya ay kuu dirto. Hadduu shil dhoco, waxaa kugu waajib ah inaad markiiba soo sheegtid.

**Goob-ka maqnaansh**

qofka biilka cayrta la siiyo wuxuu goobta uu degan yahay ka maqnaan karaa illaa 21 maalmood, isagoon biilkiisa waxba laga goynin. Haddii meel wax kororsi ah loo diro qofka xaqa u yeeshay in biilka la siiyo, waxaa dhaqan galay nidaam ka baxsan kan caadiga ah, kaa soo looga fadhiyo cidda biilka cayrta soo bandhigiisa. Goob ka maqnaanshaha ama ka fogaanshaha waa in marka hore laga codsadaa masuulka

arinaha qusaysa, ogolaanshana laga helaa. Qofka arinta masuulka ka ah hadduu arko inay kugu soo maqan tahay meel wax kororsi ah (ama Shaqo aad bilaabaysid, qoob tababar ah, fursad shaqo ama kororsi) ayuu kuu diidi karaa si aan arimahaasi dib dhac ugu imaanin inuu fasax aad goobta kaga maqnaatid ku siiyo. Marka fasaxa goob ka maqnaanshaha kaa dhamaado, waa inaad durbadiiba iska xaadirisaa masuulka ku qaabilsan. Haddaad goobta ka maqnaatid intii lagu ogolaaday, wixii maalintaa ka dambeeyo waxaa la joojinayaa siinta biilka cayrta. Waxaa dib loo bilaabayaa marka uu qofka aad iska xaadarisid masuulka arintaa u qaabilsan. Inta la joojiyay bixinta biilka cayrta, waxaa isna isaagaya bixinta caymiska caafimaadka.

Arintan waxayna qusaynin dadka 31.12.2007 cimrigoodda gaar 58 jir haddana cadeeyo inuusan diyaar u ahayn shaqo (§ 65 qaybta 4 SGB II). Dadkan iyaga ah waxay awoodaan inay 17 Isbuuc ka maqnaadaan meesha ay degan yihiin, taa soo waliba u sii socondoona siinta biilka. Waxaa qasab ah in marka hore la soo sheego.

**Cudur**

Haddaad xanuun awgeed hawl-gab u tahay, waa inaad sidda ugu dhaqsaha badan ugu wargalisid qofka masuulka kaa ah rag ama dumar. Ugu dambeyn intaysan idlaanin maalinta seddexaad ee kalendarka, marka la galo xiliga xanuunka hawl-gabnimadda ah, haddii xilli hore la codsadana waa in la gudbiyaa qoraalka hawl-gabnimadda oo doktorka soo qoray, kaa soo maalintii ugu horaysay lagu xaqiijiyay.

Haddii la xanuunsado iyagoo fasax dibadda ah lagu jiro, waxaa kugu waajib ah si aad u xajisato biilka cayrta inaad arimaha soo socdo ka taxadirtid:

- Qoraalka doktorka kugu xaqiijiyay hawl-gabnimadda waa inaad sidda ugu dhaqsaha badan ugu gudbisid caymiska ka masuulka ah meesha aad joogtid,
- Qofka masuulka kaa ah waa in bilowga hawlgabnimadda durbadiiba la wargaliyaa,
- Qoraalka la soo hordhigayo, waa in si cad oga muuqataa hawl-gabnimadda. Warbixinta doktorka oo kaliya kuma filna.

Qofka biilka cayrta la siiyo, ee ku jira hawl-diyaarin, fursad-hawlgaleed ama tababar samaynayo, waxaa ku waajib ah inuu isagana maalinta ugu horeyso ee uu jiraddo, uu ku soo sheegaa cadaynta cudurkiisa, waana inuu dhwraa xeerka u dhigan hayada biilkiisa bixisa sidoo kale qofka loo shaqeeyo.

LANDESHAUPTSTADT

WIESBADEN

kommunales jobcenter

**Qaabka Koontada loo faaqidi karo karo**

Iyadoo la raacayo Xeerka faraya run ka sheega canshuurta oo hirgalay 23.12.2003 (BGBI.2003 I S.2931) waxay maamulka maaliyadeed iyo maamulo kale oo gaar ah laga bilaabo 01.04.2005 awoodaan inay helaan aqbaarta koontadda – iyo wixii hanti ah ee bankiga kuugu jiro, iyagoo u soo maraya xaruunta federalka ee canshuuraha u qaabilsan (BZSt). Xeerkaa lagu baarayo koontadda waxaa markii ugu dambeysay la bedelay 14.08.2007 (BGBI. I S 1912).

Waxaa lagu habeeyay in si automaatik ah loo helo aqbaarta koontadda qodobka § 93 qaybta 7 illaa 10 siddoo kale § 93b nidaamka bixinta (AO). Siddoo kale waxaa lagu habeeyay nidaamka bayaanka isticmaalka qaabka bixinta (AEAO) qoraalkii soo baxay 02.01.2009

Waxaan idinku wargalinaynaa in haddii loo baahdo aan adeegsan karno qodobka § 39 qaybtiisa 9aad ee nidaanka bixinta (AO).

**Caddayn raali ka noqosho**

Waxaan raali ka ahay in inta ka kooban magaalo madaxda gobolka Wiesbaden ee waaxaha xaruumaha shaqada loo doonto, hayadaha biilka siiyo shaqo-doonku (hayadaha bixiya SGB II) arin-goobeedka 51.500101 ( hayadaha ku bixiya biilka qaabka SGB XII), nuqulo ku saabsan codsigayga ku wajahan biilka cayrta SGB II, oo waliba ah ogolaanshahii ugu dameeyay, qoraalkii laygaga joojiyay, iyo siddoo kale qoraalka doktorka oo ku cad warbixintayda inaan soo hordhigo.

Waxaan caddaynayaa in la soo qaadan karo waxii shaqsiyadayda ku saabsan, sidda meesha aan deganaha, wixii hawl-ah oo aan soo qabtay iyo hawl-raadsiga waxa is hortaagi kara oo hayada inay iiga mid dhigto goob shaqo, kaa soo ujeedadiisu tahay inaan ka qayb qaato, waxaan leeyahay raali ayaan ka ahay.

Waxaa laygu wargaliyay, hadday dhacdo in layga nusqaaminayo biilka cayrta 30% in la wargalinyo waaxda deegaanka u qaabilsan arimaha bulshadda, haddii uu jiro in qoyskanagii caruur uu leeyahay.

**Saxiixayga waxaan ku xaqiijinayaa inaan helay qoraalka wacyi-galinta ama tusaalaynta iyo inaan cadaynayo inaan siddaa raali oga ahay.**

Wiesbaden, taariikhda

____________________________

kommunales jobcenter

Saxiix

LANDESHAUPTSTADT

WIESBADEN

Landeshauptstadt Wiesbaden
Sozialleistungs- und Jobcenter

## Macluumaadka sida waafaqsan § 13 / § 14 ee Xeer-ilaalinta Guud ee Xogta Guud (GDPR)

Adiga oo bixinaya macluumaadka soo socda, waxaan jeclaan lahayn inaan ku siinno guudmar ku saabsan sida aan u hirgelineyno xogtaada shakhsi ahaaneed annaga iyo tan ku saabsan xuquuqdaada marka la eego sharciga ilaalinta xogta. Ururinta xog ururin iyo ka shaqeyntu waxay u adeegtaa inay ku siiso adeegyo sida ku cad Xeerka Labaad ee Lambarka Bulshada (SGB II).

1. Waxay masuul ka tahay habka xogta:

*Magaalo-madaxda gobolka Wiesbaden*
*Maamulka degmada*

Landeshauptstadt Wiesbaden
Der Magistrat
Sozialleistungs- und Jobcenter
Konradinerallee 11, 65189 Wiesbaden

2. Guddoomiyaha Ilaalinta Macluumaadka Rasmiga ah

*Gudoomiyaha ilaalinta xogta ee caasimadda gobolka Wiesbaden*,
Datenschutzbeauftragter der Landeshauptstadt Wiesbaden
Postfach 3920, 65029 Wiesbaden

3. Aasaaska Sharciga ee Xogta Macluumaadka

Xafiiska Badbaadada Bulshada iyo Qaxootiga ayaa dejiya macluumaadkaaga si loo hirgeliyo adeegsigaaga adeega hoos yimaada Xeerka Labaad ee Nabadgalyada (SGB II) iyo in adeegyada la helo haddii loo baahdo. Ururinta iyo falanqaynta xogtaada waxay ku kooban tahay xogta muhiimka ah. Qodobka sharciga ah ee habka xogta waa in lagu fuliyo hawl sharci ama waajibaad § 6 Sec. 1 lit. c iyo e, iyo § 9 Sec. 2 lit. b DSGVO (Datenschutz-Grundverordnung der EU ama EU Diraasta Ilaalinta Macluumaadka Aasaasiga ah) Sharciga Ilaalinta Macluumaadka) iyadoo lala
§ 35 Dukumeentiga Xeerka Bulshada (SGB I), §§ 67 ff Bogga Xeerka Bulshada 10 (SGB X - Habraaca Maamuleedka Bulshada iyo Ilaalinta Macluumaadka Bulshada), §§ 50 ff. SGB II, iyo sidoo kale sharciyo gaar ah.

Hase yeeshee, markaan si cad u codsanay inaad oggolaato falanqaynta xogta, saldhigga sharciga ah ee xogta macluumaadka waa § 6 Sec. 1 a iyo § 9 Sec. 2 ka mid ah DSGVO, iyada oo lala kaashanayo § 67 b Sec. 2 SGB X).

4. Qaybaha xogta shakhsiga ah:

Macluumaadka shakhsiyeed ee soo socda waxaa laga yaabaa in la ururiyo lagaga na baaraandego Xafiiska Nabadgelyada Aasaasiga ah iyo Qaxootiga, iyadoo ku xiran waajibaadka sharci:

Xogta aasaasiga ah:

Lambarka macaamiilka, Lambarka aasaasiga bulshada,magaca dambe, taariikhda dhalashada, meesha dhalashada, magaca dhalashada, cinwaanka, dhalashada, xaaladda guurka, jinsiga, aqoonsiga canshuurta, xaaladda degenaanshaha, CNP (lambarka aqoonsiga qofka) iyo PKZ (lambarka aqoonsiga qaranka), lambarka qoondaynta iyo taariikhda hawlgalka, AZR (Diiwaangelinta Dhexe ee Degaanka Dibadda) lambarka, Lacagta hawlgabka / Lambarka ilaalinta bulshada, heerka daryeelka, curyaanimada iyo ogeysiisyada, lambarka taleefanka (ikhtiyaar), cinwaanka e-mail (tafaasiisha), faahfaahinta bangiga

Waxyaabaha kale ee suurtogalka ah ee laga ururiyey xogta

Waqtiga ogolaanshada, cadadka faa'iidooyinka, nooca faa'iidooyinka, macluumaadka ku saabsan dakhliga iyo hantida, xogta muddada iyo joojinta shaqada iyo loo-shaqeeyaha, xogta ku saabsan dayactirka ama dib-u-celinta, macluumaadka fulinta, macluumaadka nidaamka hoos yimaada Xeerka Maamulka Dembiyada (OWiG ), xogta ku saabsan kireysiga iyo baahida hoyga iyo kuleylinta, xogta ceymiska caafimaadka iyo daryeelka caymiska iyo caymiska hawlgabka, macluumaadka caafimaadka macluumaadka ku saabsan taageerada sharciga / haynta iyo ilaalinta, macluumaadka ku saabsan faa'idooyinka bulshada, macluumaadka xaaladaha qoyska, macluumaadka shakhsiyeed Xaaladda (manhajka), caddaynta imaanshaha dugsiga iyo shahaadooyinka

5. Wareejinta xogta shakhsiyeed iyo ururinta macluumaadka shakhsiyeed

Macluumaadka shakhsi ahaaneed waxaa loo gudbiyaa dhinacyada saddexaad oo keliya iyada oo ku saleysan awoodaha iyo sharciyada (gaar ahaan shuruudaha ilaalinta xogta ee SGB X) sida: bixiyeyaasha kale ee adeegyada bulshada (tusaale caymiska hawlgabka ee Jarmalka, caymiska daryeelka caafimaadka iyo muddada dheer) Hay'adaha Dawlada Dhexe, xafiisyada canshuuraha, xafiisyada canshuuraha, hay'adaha sharci fulinta iyo masuuliyiinta ka hortagga khatarta (sida booliiska, xeer ilaaliyaha, ilaalinta dastuurka), maxkamadaha, qaybaha kale ee saddexaad sida xafiisyada degmada, Regierungs-Präsidium (Golaha gobolka) ee Darmstadt, Arimaha Bulshada iyo Isdhexgalka, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xafiiska Dhexe ee Canshuuraha, Xafiiska Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga, Bundesrechnungshof, Hay'adaha kale ee Gobolka iyo Maamulka Wiesbaden, si toos ah iyaga), bixiyaha tamarta (haddii ay si toos ah u siiyaan iyaga), la talinta deynta (oo keliya marka loo eego ruqsada qofka lala xidhiidhayo), ku dar Talo-siinta Luqadaha (oo keliya marka loo eego ogolaansho qofku khuseeyo), daryeelka nafsaani-bulsho (oo keliya oo leh ogolaansho qofku khuseeyo).

Guud ahaan, xogta shakhsiyeed waxaa laga ururiyaa qofka khusayso. Xaaladda sharci ahaan ama ogolaanshahaaga, xogta ayaa sidoo kale laga ururin karaa hay'adaha kale ee bulshada, tusaale ahaan bixiyeyaasha kale ee adeegyada bulshada.

6. Muddada Kaydinta Xogta

Muddada kaydinta macluumaadka waxay ku xiran tahay muddada ilaalinta sharciga ee kala duwan. Waxay guud ahaan tahay 10 sano oo loogu talagalay muwaadiniinta la xiriira lacagaha, laakiin waxay kaloo sii wadi kartaa kiisaska shakhsi ahaan ilaa 30 sano kaddib marka la joojiyo faa'iidooyinka.

7. Xuquuqdaada

Waxaan si cad u tilmaamnaa xuquuqdaada macluumaadka, saxitaanka, tirtirida, xaddididda farsameynta, kaydinta macluumaadka iyo mucaaradka dhamaan macluumaadka shakhsi ee la shaqeeyay, halkan. Sababta sharciga ah ee tani waa §§ 15 - 21 GDPR iyadoo lala kaashanayo §§ 81, 83 iyo 84 SGB X.

Haddii aad diiddo inaad bixiso xog amma aad ku guul daraysato inaad diiddo falanqaynta xogta, tani waxay keeni kartaa sharci darro sharci darro ah, sida inaad lumiso xuquuqdaada sharciga ah. Sidan oo kale, tani waxay sidoo kale noqon kartaa kiiska haddii aad ka noqoto ogolaansho hore loo soo gudbiyey xogta xogta (§ 13 Sec. 2 lit. c iyo e DSGVO).

8. Guddoomiyaha ilaalinta xogta Hessian

Waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbiso cabashooyinka Guddiga ilaalinta macluumaadka ee Hessian. Ciwaanka:

Der Hessische Beauftragte für Datenschutz und Informationsfreiheit
Postfach 3163; 65021 Wiesbaden

*Hessian ee Ilaalinta Macluumaadka iyo xoriyadda Akhbaarta*
*PO Box 3163; 65021 Wiesbaden*